

# DHISMAHA MUSTAQBALKA

*Raadadka Togan Ee Tababarka Xirfadaha*





08



FARSAMADA GACANTA

05



MASHAARIICDA BIYAHAYO IYO FAYADHOWORKA

06



MASHAARIICDA DHISMAHA

09



AQOON & OGAAL

10



HAWLAHA WAXBARASHADA



**Address:** Barbera Road - Hargeisa  
**Mobile:** +252633278253  
**Phone:** +252514333  
**E-Mail:** somalia.office1@gmail.com  
**Website:** www.arcosom.org

مساراًت CHARITABLE  
خيرية PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO  
 HAYADDA GARGAARKA AFRICA  
 (A.R.C) AY KAGA WARRANTO  
 MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED  
 IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (38) OCTOBER 2024





## MAAMULAH GUUD OO KORMEERAY HAWLAHA HAY'ADDA EE BORAMA



Maamulaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika (ARC), Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi ayaa booqasho shaqo ku tegey xafiiska magaalada Boorama ee hay'adda. Waxa uu u kuurgalay qaybaha kala duwan ee maamulka iyo mashaariicda ay ARC ka waddo gobalka, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen xarunta cusub ee cisbitaalka Al-Amal oo dhismaheeda la dhammaystiray hawlaha qalabayntuna hadda meel fiican marayaan. Isaga oo maamulka xafiiska Borama ay ka wada hadleen u diyaargarowga iyo diyaarinta hannaanka loo agaasimayo munaasabadda xadhig ka jarista cisbitaalka oo dhowaan qabsoomi doonta.

Dr. Mucallimi oo uu xafiiska ku soo dhoweyey Mudane Cabdiqaadi Axmed, kormeerka xafiiska Boorama, waxa uu kulamo la qaataay masuuliyiinta qaybaha kala duwan ee xafiiska, isaga oo xogogaal u noqday habسامي u socodka shaqo ee xafisiyada maamulka, maaliyadda,

mashaariicda iyo Barnaamijada uu ka mid yahay Barnaamijka kafaala qaadka agoonta. Wuxuu booqday xarunta waxbarashada Al-nuur, iyo Mac-hadka farsamada gacanta iyo xirfadaha oo ka mid ah Barnaamijka waxbarasho ee ARC ay ka waddo gobalka Awdal, isaga oo kulan la qaataay guddida waxbarashada ee gobalka u qaabilسان ARC oo uga warbixiyey halka ay hawlaha waxbarashadu marayaan, caqabadaha jira, fursadaha ay ku talinayaan in laga faa'ideeyo iyo qorshayaashooda horumarineed ee mustaqbalka.

Maamulah waxaa booqashada kuwehelinayey Mudane Nasih oo ah madaxa qaybta injineeriyyadda iyo dhismaha ee hay'adda iyo Sheekh Cabdiwaaxid oo ah madaxa waaxda xarumaha iyo dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.





## ARC Oo Ka Qaybgashay Tababar Lagu Xoojinayo Ka Jawaabista hawlaho Bani' aadannimada



Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) waxa ay ka qaybgashay barnaamij tababar uu soo abaabolay ururka REACH oo kaashanaysa ururro isugu jira maxalli, iyo kuwo caalamiya. Tababarkan oo ay ujeeddadiisu ahayd xoojinta ka jawaabista hawlaho bani' aadannimo, waxaa uu socday laba maalmood. Waxaa xoogga lagu saaray hindisaha la socoshada suuqa Market Monitoring Initiative (JMMI), iyo adeegsiga kaabaha xog ururinta ee magaciisa loo soo gaabiyo 'Kobo tool', kaas oo loo adeegsado ururinta xogaha la xidhiidhaascaarta cuntada ee suuqa si loogu xoojiyo ka jawaabista hawlaho bani'aadannimo. Waxaa si gaar ah xoogga loo saaray hannaanka loo sameeyo la socoshada suuqa (JMMI), dejinta yoolasha laga gaadhayo, waqtiga, iyo sababaha loo dhaqangelinayo. Sida oo

kale ka qaygalayaashu waxa ay barteen noocyada xogta suuqa laga ururiyo ee JMMI, isla markaana ay ansixisay REACH, ka hor inta aan loo dirin diiwaannada dadweynuhu kala socon karaan.

Mudane Daa'uud Axmed oo ah madaxa Barnaamija kafaalaqaadka, iyo Mudane Cabdiraxmaan Axmed oo ka tirsan qaybta mashaariicda ayaa ARC uga qaygalay tababarkan. Casharrada la siiyey ka qaygalayaasha waxaa ka mid ah hagaha xog ururinta si xog ururiyuu u helo xog sax ah, iyo talooyin wax-ku-ool ah oo lagu xaqiijin karo in xogta la soo gudbiyey ay sax tahay, taas oo lagama maarmaan u ah xoojinta dadaallada hawlaho bani'aadannimo, iyo in si midho dhal noqota loo gaadho daboolista baahida bani'aadannimo.

## MASHAARIICDA BIYAH IYO FAYADHOWRKA



### ARC OO LABA CEEL BIYOOD KA HIRGELISAY DEEGAANKA KISMAAYO

ARC ayaa laba ceel biyood ka qodday deegaanka magaalada Kismaayo ee xarunta dawlad-gobaleedka Jubaland. Labadan ceel oo laga hirgeliyey aag oomane ah ayaa awood u leh, in ay ku filnaadaan baahida biyood ee illaa 600 oo qof, iyo xoolahooda.

Qodistaceelashabiya iyo biyodhaamiska xilliyada abaaruuhu, waxa ay ka mid yihiin Barnaamijyada biyaha iyo fayadhowrka (WASH) ee ay ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee Geeska Afrika, iyada oo gacan ka helaysa samafalayaal u dhashay Kuweyt oo soo mariya hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.





## DHISMAHA RUGTA CAAFIMAADKA EE AMAL OO MEEL FIICAN MARAYSA



Waxaa meel gebogebo ah maraya dhismaha Rugta Caafimaadka ee Amal oo ay ARC ka waddo magaalada Borama ee gobalka Awdal, Somaliland. Xaruntan oo ay maalgelisay hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt, waxaa dhammaystirmay dhismihii guud iyo kaabayaasha badankoodii, waxaan hadda bilaabmaya marxaladda ku xigta oo ah qurxinta iyo dhammaystirka dhismaha, iyo keenista iyo Rakibista qalabka

caafimaadka ee lagama maarmaanka ah.

Rugta caafimaadka ee Al-Amal oo si casri ah loo qalabayn doono, ayaa uu qorshuhu yahay in ay dadka degmada Boorama siiso adeegyo caafimaadka oo dhammaystiran. Mashruucani waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka caafimaada ee ay deegaannada Soomaalida ka waddo hay'adda ARC, iyada oo maalgelinta ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.



## KORONTO KU SHAQAYNAYSA TAMARTA QORRAXDA OO LAGU XIDHAY BEERTA SAMAFALKA EE BOORAMA



Maamulaha guudee ARC, Dr. Cabdiraxmaan Al-mucallimi ayaa dhagax-dhigay, mashruuc ceelasha biyaha ee beerta Samafalka ee Borama loogu samaynayo nidaam biyo-soo-saar oo ku shaqaynaya tamarta korontada. 90 saxannada qorraxda tamarta u beddelo ah oo mid kastaa uu soo saari karo 550-watt oo koronto ah, ayaa lagu rakibay ceelashan oo loogu talagalay in sannadka oo dhan biyo laga helo, taas oo kor u qaadaya waxsoosaarka beerta, hoosna u dhigaysa kharashaadkii ku bixi lahaa.

Dr. Mucallimi oo ka hadlay munaasabadda xadhiga lagaga jarayey

mashruuca korontada ceelashada ayaa hawladeennada kula dardaarmay in aad loo ilaaliyo qalabkan si waxtarkoodu u noqdo mid muddo dheer la intifaacsado. Dhinaca kalana waxa uu masuuliyiinta beerta la falanqeeyey siyaabaha ugu habboon ee loo sii ballaadhin karo waxsoosaarka beerta, iyo habka loogu dari karo qayb shinni ah oo malabka soosaarta, iyada oo laga faa'idaysanayo shinnida lagu hayo beeraha Hargeysa. Mashruucani waxa uu qayb ka yahay dadaalka ay ARC ugu jirto in ay ka midho dhaliso yoolka joogtaynta horumarka iyo xoojinta waxsoosaarka maxalliga ah.





# DHISMAHA MUSTAQBALKA

*Raadadka Togan Ee Tababarka Xirfadaha*

Tababarka xirfadaha iyo waxbarashada farsamada gacanta waa shamaca rejada ee bulshooyinka Geeska Afrika. Waa dariiq shaqo-abuur oo ay dhalinyarada ku wanaajin karto noloshooda, kagana qaybqaadan karto kor u qaadista nolosha bulshooyinkooda.

Tababarrada xirfadaha iyo waxbarashada farsamada gacanta waxa ay kobciyaan awoodaha, iyo kartida looga baahan yahay shaqada. Waxa aanay udub dhextaad u noqdaan horumarka dhaqaale iyo bulsho ee bulshadu ay higanayso.

In kasta oo ay jiraan caqabado ay ka mid tahay, heerka shaqo la'aanta iyo saboolnimada oo aad u sarraya deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, haddana hindiseyaasha kobcinta xirfadaha iyo waxbarashada farsamada gacanta ma xoojiyan cududda shaqaale ee loo baahanyahay oo keliya, balse sida oo kale waxa ay kobciyaan waxsoosaarka, taas oo sababaya koboc dhaqaale iyo in ay abuurmaan fursado shaqo oo cusub.

Waxaa marag inoogu filan wararka togan iyo warbixinaha muddooyinkii u dambeeyey arrintan laga sameynayey oo muujinaya isbeddel wax-ku-ool ah oo ku yimi tababarrada xirfadaha iyo farsamada gacanta. Boqollaal dhalinyaro ah ayaa la baraa xirfado kala duwan oo ay ka mid yihii, Nijaaradda, farsamada birta iyo tumaalka, Qaboojiyeasha iyo alamuuniyada. Xirfadaas oo albaabada u furay in dhalinyaro badani ay ku filnaadaan nolosha qoysaskooda.

ARC oo hawlaas kaalin mug leh kaga jirtaa, waxa ay si joogto ah u sii horumarisaa barnamaiyyadeeda kobcinta xirfadaha iyo waxbarashada farsamada gacanta, kuwaas oo si togan wax uga taray baahidii shaqo ee suuqa taallay. Siyaasadda ARC waxa ay xoogga saaraysaa kobcinta awooddha iyo kartida shaqo ee haweenka oo ah laf-dhabarta dhaqaale ee bulshada Soomaaliyed, gaar

ahaan xilliyada colaadaha iyo barakaca abaarahaa iyo masiibooyinka dabiiciga ahi dhacaan.

ARC oo uu yoolkeedu yahay in la helo fursado shaqo oo ay bulshadu u siman tahay, waxa ay magaaloojin kala duwan ka hirgelisay mac-hadyada farsamada gacanta oo si heersare ah u qalabaysan, waxa aanay dibadda ka keentay xeeldheereyaal kala duwan oo ardayda waxbaara, si tayada kor loogu qaado. Barnaamijkaas oo ARC ay iska kaashadaan ururro iyo deeqbixiyeyaa isugu jira kuwo caalamiya iyo kuwo deegaan, waxaa ka mid ah samafalayaal deeqo kala duwan soo mariya hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo fadhigeedu yahay dalka Kuwetyl.

Afartii bilood ee u dambeeyey ARC waxa ay ku guulaysatay fulinta mashaariic tababar oo isugu jira farsamada gacanta, kobcinta xirfadaha shaqo iyo tababarka xoojinta dhaqaalaha qoyska, sida cunto karinta iyo maaraynta Kijada, iyo dawaarka. Mashaariicdaas waxaa ka faa'idaystay dhalinyaro tiradoodu 200 gaadhayso, kuwaas oo la siiyey qalabkiif farsamada gacanta iyo makiinadda dawaarka, si loogu diyaariyo in aanay caqabad kala kulmin bilowga hore ee gelitaanka suuqa shaqada.

Sii wadista iyo xoojinta Waxbarashada iyo tababarrada xirfadaha iyo farsamada gacantu, waa maalgelinta mustaqbalka bulshada Soomaaliyed. In dhalinyarada la siyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah waxsoosaarkuna, waxa ay lagama maarmaan u tahay dadaalka lagaga gudbayo caqabadaha saboolnimo iyo dib u dhac dhaqaale ee hadda taagan, laguna rumayn karo higsiga qarniga ee hirgelinta horumar waara. Taas macnaheedu waa in tababar iyo koorsa kasta oo waxbarasho aanay ahayn keliya xirfad iyo casharo la korodhsaday, balse ay tahay dhismaha bulsho kaalin muhiim ah ka qaadan karta horumarka dhaqaalaheeda.

## AQOON & OGAAL



### Kormeerayaal Waxbarasho Iyo Macallimiin Tababar La Siiyey



Hay'adda Gargaarka Afria (ARC) ayaatababarsaddex maalmood socday u soo xidhay kormeerayaasha waxbarashada iyo barayaasha xiftiga Qur'aanka. Tababarkan oo halkudheggiisu ahaa "Aqoon iyo Iimaan baa meel sare lagu gaadhaa" waxaa ka faa'idaystay macallimiin iyo barayaal Qur'aan oo ka socday xarumaha iyo dugsiyada hay'adda ARC ay maamusho ee ku yaalla magaaloooyinka Hargeysa, Jigjiga, Burco iyo Boorama.

Ujeeddada tababarka waxa ay ahayd xoojinta aqoonta iyo kartida shaqo ee ay u baahantahay dhigitaanka culuumta shareecada Islaamku, waxaana tababartayaasha lagu xoojiyey xirfado muhiim u ah macalinnimada iyo tabaha waxbarista ee casriga ah, taas oo u fududaynaysa in ay sida ugu midha dhalsan, uguna fudud u gutaan waajibaadkooda.

Maamulaha guud ee ARC, Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi oo ka hadlay tababarkan ayaa soo dhoweyey tababartayaasha laga keenay deegaannada kala duwan. Hadal kooban oo uu furitaanka ka jeediyyey ayaa uu ku booriyey in casharrada ay ka bartaanna ay uga faa'idaystaan hawlaho waxbarasho ee ay gacanta ku hayaan.

Mudane Axmed Cabdisamad oo ah madaxa xarunta Kuweytiga ayaa isaguna tababartayaasha u soo bandhigay, barnaamijka maalinlaha ah ee qaybta hoyga ee dhammaan xarumaha kala duwan ee waxbarashada. Sida oo kale Mudane Muxamed Cabdalwahaab oo ah madaxa Barnaamijka waxbarashada ee ARC, ayaa hadal kooban oo uu ka jeediyyey munaasabaddan waxa uu ka warramay muhiimadda tababarkan oo ah kii lixaad ee ay ARC u qabato hawladeennada waxbarashada.

Macalimiinta iyo masuuliyiinta ka faa'idaystay tababarkan ayaa iyaguna soo bandhigay mawduucyo kala duwan oo la xidhiidha manhajka waxbarashada shareecada, iyo noocyada kala duwan ee ay tahay in baruhu u gudbiyo. Wuxuu kale oo ay soo bandhigeen soojeedin ay ka sameeyeen dhismaha iyo horumarinta hannaan midaysan oo lagula socon karo waxbarashada, xirfadda iyo barbaarinta ardayga iyo la socoshada anshaxiisa.

Ugu dambayn tababartayaasha ayaa la guudoonsiiyey shahaadooyin caddaynaya waxa ay barteen iyo bogaadinta kaalinta firfircooni ee ay ka qaateen hawshan waxbarasho ee loogu diyaar garoobayo sannad-dugsiyedka labaad ee sannadkan 2024.





## Hablaха Dugsiga Sare Ee Kuweytiga Oo Soo Bandhigay Hal-Abuurka Qurxinta Fasalka



Dugsiga sare ee Kuweytiga qaybtiiisa Hablaха ayaa mar kale qabtay bandhigga qurxinta fasallada. bandhiggan oo sannadle ah ayaa ay habluhu ku soo bandhigeen hal-abuur iyo farshaxan aad u heersarreeya oo ay ku qurxiyeen fasalladooda.

Ardayda oo kaashanaya macalimiintooda ayaa muuijyey, karti yaab leh oo ay dareenkooda iyo nafsaddooda ku qeexi karaan farshaxan iyo nashaqadayn. Wuxuu aanay fasalladii u rogeen Beero cagaaran, maktabadado yaryar iyo masraxyo yaryar.

Guddi loo xulay qiimaynta qurxinta fasallada ay habluhu soo bandhigeen, ayaa heerka hal-abuurka fasal kasta ku qiimaynaysay halbeegyo ay ka mid

yihii hal-abuurka ku dhix duugan farsamada qurxinta ah ee ay ardayda samaysay, nidaaminta, iyo sida ay isu waafaqsan yihii qurxinta ay habluhu sameeyeen iyo mawduuca sannadkan loo doortay tartanka. Ugu dambayntiina waxaa abaalmarin la guddoonsiyyey fasallada buuxiyey shuruudii lagu qiimaynayey qurxinta fasalka.

Bandhigga qurxinta fasalka ujeeddadiisu waa in ardayda lagu dhiirrigeliyo barashada xirfadaha farsamada gacanta, godlinta hal-abuurkooda, dhiirrigelinta farshaxanka iyo in la baro iskaashiga iyo wax wada qabsiga, si looga wada shaqeeyo danta guud iyo waxa la wadaago, iyo in wacyigooda lagu baraarujiyo muhiimadda ay leedahay ilaaliinta deegaanka dugsigu.





@africanreliefco



**Address:** Barbera Road - Hargisa

**Mobile:** +252633278253

**Phone:** +252514333

**E-Mail:** somalia office1@gmail.com

**Website:** www.arcosom.org

